



**Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya
Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska**

Xafiiska Wasiirka

**Warsaxaaafadeedka dhalinyadda Soomaaliyeed ee ku xidhxit han India, Seychelles
iyo meelo badan oo daafaha aduunka ah.**

Dawladda Federaalka ah ee Soomaliya waxay ka xuntahay dayaca, cadaalad darada iyo dhibaatooyinka ku haysta dhalinyaradda Soomaaliyeed ee ku eedaysan burcad badeednimadda ee ku xidhan daafaha aduunka. Xogo dawladda Soomaaliyeed heshay waxay ku ogaatey in dhalinyaradaas badankooda ahaayeen kaluumaysato, ayna qabqabteen maraakiib ama doonyo hubeysan oo aan iyaga laftigooda wax sharciyad ah u haysan in ay soo galaan biyaha Soomaaliya ama ka kaluumaystaan xilli ay kacsaneyd cabsidda laga qabo budcad badeedka geeska Africa.

Waxaa la faray Wasaaradda Arimaha Debedda ee Soomaaliya iyo Safaaraadaha Soomaaliya ee jooga meelaha ay ku xidhan yihiin dhalinyaradaasi in ay si dhow ula socdaan xaaladaha ammaan, caafimaad iyo daryeel ee ay ku sugan yihiin muwaadiniintaas Soomaaliyeed, talaabadda uga haboonna u qaadaan sidii ay u heli lahaayeen cadaalad, cafis iyo in dib loogu soo celiyo dalkooda hooyo.

Dawladda Soomaaliya waxay ka codsanaysaa Dawladaha ay ku xidhan yihiin dhalinyaradaas ku eedeysan burcad badeednimada sida Hindiya, Seychelles, Kenya iyo dhamaan Wadamadda kaleba in ay hubiyaan daryeelka bini'aadnинимо iyo garsoor ee ay xaqqa u leeyihiin muwaadiniintaas Soomaaliyeed, iskana xil saaraan sidii ay u heli lahaan garsoor cadaalad ah maadaama aanay Dawladda Soomaaliyeed maanta awood u lahayn in ay u soo dirto qareeno u doda. Wuxaanu mar labaad ka codsanaynaa wadamadda ay xabsiyadooda ku jiraan dhalinyarada ku eedeysan burcad badeednimada in ay cafiyaan, kuwa xukumanna u soo wareejyaan in ay dalkooda ku qaataan xabsigooda, maadaama wacyigelin ay sameysay Dawladda Soomaaliya, ka dib, uu hada dhamaaday burcad badeedkii Bariga Africa.

Dhamaad

25/09/2016

